

Waxa ay Shaqaalaha Caafimaadku U baahan Yihiin inay Ogaadaan

Carbapenem-Resistant *Enterobacterales* (CRE)



CRE waa bakteeriyo ku faafta xarumaha daryeelka caafimaadka wayna adkaan kartaa in la daweeyo.

WAA Maxay CRE?

- CRAB waa nooc bakteeriyada kamid ah oo keeni karta caabuqyo xun.

MAXAY khubaradu uga walaacsan yihiin? MAXAAN ugu baahan nahay inaan ka walwalno?

- CRE way adkaan kartaa in la daweeyo waayo badanaa ka maraan daawooyinka bakteeriyada dila.
- Wuxuu si fudud iskaga gudbaa dadka, ama goobaha bakteeriyada leh iyo qalabka caafimaadka ee la wadaago.
- Inta badan dadka qaba CRE ayaan lahayn wax astaamo ah ama calaamado ah; tan waxaa loogu yeeraa colonization (guumaysi cudur).
- Caabuqyada CRE ayay adkaan kartaa in la daweeyo waxayna keeni karaan xanuun daran ama dhimasho.

YAA khatarta ugu wayn ugu jira qaadista CRE?

- Dadka jooga xarumaha daryeelka caafimaadka ee qaba dhaawacyada furan ama tuubooyinka la gasho jirka (tusaale, tuubooyinka quuddinta, tuubooyinka neefsiga, iyo tuubada dhuunta).
- Dadka nidaamyada difaaca jirkood uu liito.
- Waxyaabaha khatarta kordhinaaya waxaa kamid ah qabista taariikhda xanuunada badan, qaliinka dhawaa, ama nabarada badan ee maqaarka.
- Dadka caafimaadka qaba ayay yar tahay fursada qaadista CRE.

SIDEE uga difaaci karaa bukaanadeena CRE?

- Adeegso kahortagyada taabashada (tusaale, nadaafada gacmaha, shuluga caafimaadka, iyo gacmo gashiyada) marka aad daryeel siinayso qof lagu ogyahay ama looga shakiyay CRE.
- Si adag jeermiska uga dil goobaha iyo qalabka caafimaadka.
- Mar kasta raac tilmaamaha keli-yeelida ee ku qoran qolka bukaanka.

XAGEE ayaan ka heli karaa xog dheeri ah?

- www.sdhai.org

08/29/2023